

*Xarunta PACER waxay ku dhiirigelisaa waalidiinta inay marka hore isku dayaan xallinta khilaafaadka, iyago la wadaagaya welwelka ku saabsan adeegyada waxbarasho ee Barnaamijka Waxbarashada Gaarka ah (IEP) ee ilmahooda maamulaha kiiska (IEP case manager) iyo/ ama agaasimaha waxbarashada gaarka ah ee degmada dugsiga.*

Wac 952.838.9000 ama u dir email [PACER@PACER.org](mailto:PACER@PACER.org) si aad ula hadasho u doodaha (advocate) waalidka ee PACER. Oo aad u weydiiso wixii welwel ama su'aalo aad ka qabto xeeladaha lagula xiriiro degmada dugsiga, iyo dhammaan dariiqadaha xulashooyinka xallinta khilaafaadka.

Si aad wax uga ogaato fursadaha kale ee xallinta khilaafaadka Minnesota, eeg daabacaadda xarunta PACER ee Xulashada Xalinta khilaafaadka ee Minnesota: Kulamada waxbarashada gaarka ah oo ay waalidiinta iyo degmooyinka dugsiyadu ka wada shaqeeyaan si loo xaliyo khilaafaadka.

Si aad u hesho macluumaad faahfaahsan oo ku saabsan dhammaan fursadaha xallinta iyo helitaanka ilaha la xidhiidha khadka tooska ah ee moobilka, sahmi Xarunta PACER Hagaha Xallinta Khilaafaadka ee waalidiinta Minnesota.

Waxaad sidoo kale la xiriiri kartaa Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota (MDE), qaybta Caawinta iyo ilaalinta habraaca 651.582.8689 ama [mde.assistance.compliance@state.mn.us](mailto:mde.assistance.compliance@state.mn.us).

## PACER waxay ku riyaaqda inay tahay Xarunta Tababarka iyo Macluumaadka Waalidka

Xarunta PACER waxey waalidiinta leh caruurta iyo dhalinyarada dib u-dhaca leh u fidisaa macluumaad, tababaro, iyo caawimaad, si loo ballaariyo fursadaha waxbarasho iyo kor u qaadida tayada nolosha qof walba, tan iyo 1978.



### **PACER Center, Inc.**

8161 Normandale Blvd.  
Minneapolis, MN 55437-1044  
952.838.9000 | 800.537.2237  
[PACER@PACER.org](mailto:PACER@PACER.org)  
[PACER.org](http://PACER.org)

**[FB.com/PACERCenter](https://www.facebook.com/PACERCenter)**  
**[Instagram.com/PACERCenter](https://www.instagram.com/PACERCenter)**  
**[Twitter.com/PACERCenter](https://twitter.com/PACERCenter)**

Daabacaadan waxa suurtageliyay maalgelin ka timid Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota.

## Xulashada Dooroka Khilafaad Xalinta ee Minnesota

(Minnesota Dispute Resolution Options – Somali Version)

## Hab-raaca dacwad xareynta ee u banaan walidiinta ilmaha naafada ama dib u-dhaca leh

Complaint processes available to parents of students with disabilities



**PACER CENTER**

KOOXDA UGU HOREYSA HALGANKA WAX U QABADKA CARUURTA LAXAADKA L'A®

952.838.9000 | [PACER@PACER.org](mailto:PACER@PACER.org) | [PACER.org](http://PACER.org)

# Doorarka Khilaafaad Xallinta Minnesota

Shaxda isbarbardhigga ee **hab-raaca cabasho xareynta** ee ay heli karaan waalidiinta ardayda naafada ah

Nooca Cabashada	Cabasho Waxbarashada Gaar-Ahaneed	Hab-raaca cabashada/Dhageysi Nidaam Sharci ah	Cabasho Takoreed
<b>Wa maxay sababta codsiga</b>	Haddii aad ka walaacsan tahay in degmada dugsigu racin, ama weli raaceyn sharciyada, ama xeerarka waxbarashada gaar-ahaneed ee dawladda dhexe ama gobolka	Haddii aad khilaaf kala dhexeyso degmada dugsiga ee ku saabsan aqoonsiga, qiimaynta, meelaynta waxbarashada, ama bixinta Habboon oo Bilaash ah Waxbarashada guud ee ilmahaaga. Haddii murankaagu uu salka ku hayo muuqaal go'aanka ama go'aanka la xiriira anshaxa ee saameeya ilmahaaga meelaynta, waxaad xerayn kartaa cabasho hab-socodka xuquuq dhowrka leh oo la dedejiyay.	Haddii aad ka welwelsan tahay ilmahaagu la kulmay Takoorid ku salaysan ka mid ahaanshaha dabaqad kasta oo la ilaaliyo sharciga gobolka iyo federaalka. Mitaal, sharciyada la ilaaliyo waxaa ka mid ah Jinsiyad, midab, caqiido, diin, asal qaran, jinsi, heerka guurka, naafada, heerka la xidhiidha kaalmada dadweynaha, iyo da'da.
<b>Sida loo xareeyo</b>	Buuxi Foomka Cabashada Waxbarashada Gaarka ah, una dir Wasaaradda Minnesota ee Waxbarashada (MDE) iimayl ahaan <a href="mailto:mde.assistance.compliance@state.mn.us">mde.assistance.compliance@state.mn.us</a> ama fakis ahaan <b>651.582.8725</b> file	Buuxi Cabashadda iyo Codsiga Habka Dhegeysiga ee Dacwadda ee u dir Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota. Dugsiga degmadu sidoo kale waxay xerayn karaan cabasho. <b>FIIRO GAAR AH:</b> Qaareen sharci maaha in loo baahan yahay, laakiin hagidda qareenka ayaa caawin karta waalidka.habka sharciga ah. Degmooyinka dugsiyadu waxay inta badan isticmaalaan qareen.	Hababka cabashada way kala duwan yihiin wakaalad ahaan. Waxaad xareyn kartaa cabasho Dugsiga degmada ilmahaaga, Wasaaradda Minnesota ee Xuquuqda Aadanaha (MDHR), ama Waaxda Maraykanka Xafiiska Waxbarashada ee Xuquuqda Madaniga ah (OCR).
<b>Jadwalka Waqtiga</b>	Xadgudubyada aad ka andaconeyso ee ku jira cabashadaada waa in ay dhaceen hal sano gudaheed laga bilaabo taariikhda waqtiga Wasaaradda Waxbarashadu heshay cabashadaada	Waa in aad cabashada ku xeraysa laba sano gudahood, laga bilaabo taariikhda aad ogaatay ama ay aheyd in aad wax ka ogaato falka aad tabaneyso ee saldhiga u ah cabashadada. 15 maalmood gudahooda markaad hesho ogeysiiska cabashadaada, Degmadu waa in ay diyaarisaa kulanka xalinta. Haddii cabashadaada lagu xalin waayo 30 maalmood gudahood laga bilaabo maalinta la helo cabashada, waxa bilaabmaya wakhtiga dhagaysiga dacwada. Haddii aad fayl garaysay codsi dedejismo habsocodka cabashada, waa in la dedejiyaa dhageysiga dacwad cadaalada oo cadaalad ah 20 maalmood oo sanad dugsiyeedka ah.	Haddii aadan heli karin kheynuunka nidaamka takoor la'aanta ee degmada dugsiga, iyo nidaamka cabashada ee onlayn, la xidhiidh xafiiska Kormeeraha Guud (superintendent) ee degmada dugsiga si loo xaqiijiyo. Si aad cabasho uga xarayso MDHR, wakhtiga xaddidan waa hal sano Gudaheed laga bilaabo taariikhda dhacdada. Si aad cabasho u gudbiso Xafiiska Waxbarashada ee Xuquuqda Madaniga ah OCR, wakhtiga xaddidan caadi ahaan 180 maalmood gudahooda falkii ugu dambeeyay ee takooridda.
<b>Go'aan qaade</b>	Qaybta kaalmada iyo sharci ilaalinta ee Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota	Haddii lagu xalliyo kulanka xallinta, waalidka iyo dugsiga degmada. Haddii ay cabashadu aado dhegaysi, Garsooraha Sharciga Maamulka ee ka socda Xafiiska Dhegeysiga Maamulka ee Minnesota.	Heerka dugsi degmo, Iskuduwaha Xuquuqul Insaanka, Sarkaalka U Hogaansanaanta Xuquuqda Madaniga ah, Iskuduwaha IX, ama Iskuduwaha Sharciga Xeerka Naafada Ameerikaanka/504. Dhanka MDHR, haddii aan lagu gaadhin dhexdhexaadin, cabashada waxaa lagu xalliya maxkamada. Dhanka OCR, baaraha loo qoondeeyey cabashadaada.
<b>Natiijada</b>	Xaalado qaas ah marka reebo, 60 maalmood gudahooda marka ay MDE hesho cabasho, go'aan kama dambays ah, oo ku jiri kara qorshe hawl sixid ah, ayaa la garaa oo loo dira waalidka iyo dugsiga degmada	Haddii ay cabashadu aado dhegaysi, go'aan sharci ah ayaa la soo saari karaa 75 maalmood gudahood, laga bilaabo taariikhda cabashada la xareeyay. Laakiin waqtigan xaddidan badanaa waxaa loo kordhiyaa sabab wanaagsan. Dhegeysiga habraaca cadaaladeed ee la dedejiyey, go'aanka waa in lagu soo saaraa 10 maalmood gudahood.	Natiijooyinka ka soo baxa baaritaannada cabashooyinka takoorka weykala duwan yihiin hay'ad ahaan. Si toos ah ula tasho degmada dugsiga, MDHR, ama OCR wixii macluumaad dheeraad ah.